

Dharbaaxada

Waalidku badanaa ma dharbaaxaan caruurtooda. Hadana dad badan ayaa mararka qaarkood dharbaaxa ilmahooda. Waayo? Sababta waalidku u dharbaaxo waxaa ka mid ah:

“Dharbaaxadu waa ii shaqeysaa.”

Dharbaaxidu waxay soo jeedineysaa dareenka ilmahaaga, waxayna joojineysaa wixii ilmuhu sameynayey—markaas ayada ah. Dharbaaxadu ilmaha ma barto waxa aad ka rajeynayso, ama sida loo dhaqmo aayaha dambe. Ilmaha ma barto inay si fiican u dhaqmaan marka aan waalidku joogin oo aysan ogeyn in sharciga la raacay.

“Haddii aanan ilmaha la dharbaaxin, akhlaaqda ayaa ka lumeysa.”

Dharbaaxadu ilmaha kama celiso inaysan halaabin. Caruurta halaabay waxay barteen inay wixii ay rabaan ay ku heli karaan oohin iyo kiis iska waalid. Waalidka caruurtooda haleeya waxay ilmaha u qabtaan wixii ay rabaan, meeshii ay caruurta ka bari lahaayeen sidii ay wax u qabsan lahaayeen. Sida ugu wanaagsan ee ilmaha looga ilaaliyo inaysan halaabin waa adigoo jeclaada si wanaagsana u daryeela, sharci cadna u sameeya dhaqankooda.

TUSAALEYNTA WAALIDKA

Khasnadda dareenkaaga.

Uga feker waalidnimada sida khasnadda bangigaaga oo aad ilmahaagu ku haysato. Wax kasta oo wanaagsan-salaanta, amaanida, khibrad barida, iyo meel marinta sharciyadu waa-keyd lagu xareeyey akoonkaas. Wixii xun ee aad sameyso-ku qaylin, dharbaaxis, ceebeyn-waa wax aad kala baxday akoonka. Waa inaad keydiisa in ka badan inta aad la baxeyso si aad xiriir wacan ula lahaato ilmahaaga.

**“Dharbaaxada waa iska ilaaliyaa,
balse waxaad moodaa wax kale ma
shaqeeyaan.”**

Waalid badan ayaa qaba in dharbaaxadu wanaagsan tahay, mararka qaarkoodna loo baahan yahay. Waalidku hal wax keliya ayey ka fekeraan marka ilmuhu si xun u dhaqmo: dharbaaxo. Waalidku waxay ilmaha dharbaaxaan markii ay xanaaqsan yihiin ama wareeraan. War fiican waxaa ah in ay jiraan siyaabo kale oo loogu jawaabi karo marka ilmuhu si xun u dhaqmaan. Waalidka waxyaabaha kale u isticmaala inay edbiyaan ilmaha, badanaa waxay ogaadaan in waxyaabaha kale ka fiican yihiin dharbaaxada.

**“Dharbaaxadu waa qayb ka
mid ah dhaqankeega.”**

Dharbaaxada aad ayaa looga isticmaalaa dhaqamo badan. Waa wax bulshooyin badani sameeyaan, dhaqan ay gooni u tahayna ma jiro.

**“Waa la i dharbaaxi jiray si fiican
ayaana u soo koray.”**

Badanaa dadka la dharbaaxi jiray waxay u koraan si caadi ah. Arintu si kasta ha ahaatee, taasi uma dhicin dharbaaxada awgeed. Macnaheeduse waa in waalidkood ay isticmaaleen qaabab kale oo wanaagsan oo ay ku tarbiyeynayaan. Waxaan daraasaad la sameeyey ka ogaanay in dharbaaxadu ilmaha u horseedi karto dhibaatooyin ay ku jiraan isla-hadal, xaas dhibaateyn, iyo isticmaalka kimikada.

